Warbixinaha guud ahaaneed ee shaqooyinka xagaaga iyo dalbashadooda Oulu oo soomaali ah

CV iyo codsiga shaqadaand

Shaqooyinka xagaaga ka hor dalbashadooda waa inaad u sameysatid CV, oo ah liiska kasbashada. CV ga wanaagsani waa hal bog mid hdan, oo bayaan ah taas oo aanan lahayn khaladaad qoraal ah. Samayso hal CV oo wanaagsan, kaas oo aad u isticmaali kartid dalbashada shaqooyin badan oo xagaaga ah dalbashadooda. Xusuuso inaad mar walba CV ga buuxisid!

Ku sheeg CV ga si gaaban naftaada: yaad tahay maxaadse ku wanaagsan tahay. CV:ga ku soo qor liiska iskuuladaada, khibradaada shaqoo iyo aqoontaada. Intaa waxaa dheer oo aad liiskaaga ku qortid tusaale ahaan hiwaayadaada. Xusuuso inaad ku soo qortid Cv gaaga magacaaga oo buuxda, telefoon lambarkaaga iyo cinwaanka iimaylkaaga, si shaqo bixiyuhu uu kuula soo xidhiidho.

CV:ga wanaagsan waxaa ku jira arrimahan:

- Warbixinta xidhiidhkaaga ay ka soo muuqato qeybahaagu.
- Khibradahaaga cusub iyo kuwii horeba, shaqada bilowgeeda- iyo dhammaadkeeda iyo qeexitaan gaagaaban ee shaqooyinkaaga ah.
- Takhasuskaaga cusub iyo kuwii horeba, machadyadii iyo waxbarashooyinka, waxbarashada bilowgeeda- iyo maalmaha ay kuu dhamaadeen, sidoo kale takhasusyada aan u dhamaanin.
- Dhameystirka iskuulada iyo koorsooyinka, tusaale ahaan khaadka nadaafada (hygienipassi).
- Xirfadaha digiga maareyntooda, barnaamijyada iyo ku haboonaanshahooda, tusaale ahaan Word ka.
- Aqoonta xirfadaada iyo qiimeynta aqoontooda, tusaale ahaan: luqadda hooyo, si wanaagsan, wadashaqeynta ku filan, bilowgeeda.
- Hiwaayadahaaga ama waxyaalaha aad xiiseyneysid.
- Kuwa suurtogalka ah inay ku amaanayaan.
- Waxaad ku kordhin kartaa sidoo kale sawir munaasab ah ooiskaa ah liiska shaqo kasbashada qeybtiisa kore.

CV:ga waxaa dheer oo aad u baahan tahay codsiga shaqada. Codsiga shaqada hadafkeedu wuxuu sugayaa shaqo bixiyaha ah, in adigu aad tahay shaqaalaha ku habboon codsigaa goobta shaqada. Codsigaaga ku sheeg, cidda aad tahay, maxaad u dalbaneysaa shaqadaa la sheegayo iyo maxaad aqoon leedahay.

Codsigaaga shaqada waxaad ku tilmaameysaa codsigaaga niyad u haynta codsiga shaqadan. Khibrad shaqo oo wanaagsan waa mid munaasab ah bayaana ah. Xusuuso inaad ku qorto salaan xushmad leh codsigaaga bilowgiisa iyo dhammaadkiisaba. Codsigaaga shaqadu uma baahna inaad ku celiso warbixinaha liiska kasbashada shaqadaada.

Khibradaada shaqo ee wanaagsan ku sheeg arrimahan:

- Shaqooyinkee ayaad dalbaneysaa.
- Maxaad u xiiseyneysaa shaqadan aad dalbaneysid?
- Maxaad ka soo baratey shaqooyinkaagii hore? Ku hay maskaxdaad codsiga shaqada; sidee ayey aqoontaadu u caawineysaa shaqada, tan aad dalbaneysid?
- Sheeg adiga laftaada iyo dabeecadaada.

    ✓ Ku kalsoonow naftaada, ammaan naftaada iyo aqoontaada, laakiin daacad ka ahow.

    ✓ Sidee ayey dabeecadaada iyo waxyaalaha kale ee aad haysataa u caawinayaan codsiga shaqadaada?

Sateliga shaqada xagaagu waxay

Haddii aad tahay 15- 17 jir reer Oulu ah,waxaad ka heli kartaa magaaladda Oulu sateliga shaqada xagaaga. Sateliga shaqada xagaagu waxay taageereysaa shaqo bixiyaha shaqo u qaadashadaada. Sateliga shaqada xagaagu waxay taageereysaa shaqo bixiyaha adiga shaqo u qaadashadaada. Sateliyada shaqada xagaaga waxaad heli kartaa kaliya hal xagaa.

Sateliga shaqada xagaaga waxaad ku dalban kartaa shaqooyinka Oulu, Muhos, Hailuoto, Tyrnävä, Liminka, Kempele, Ii ama Lumijoki. Shaqo bixiyayaashu waxay noqon karaan shirkado, ururo, hay'addo, naadiyo ama aasaasayaal. Xilliyada shaqadu wiigii waa 30 saacadood, labada wiig ama isku geyntoodu waa 60 saacadood xilligga xagaaga (1.5. - 30.9.). Warbixinaha dheeraadka ah iyo shqooyinka banaan waxaad ka heleysaa iyadoo af finnish ah cinwaanka businessoulu.com/kesatyo.

Tababarada shaqooyinka xagaagu

Haddii aad 18 sano buuxisay ardey reer Oulu ahna tahay, waxaad ka dalban kartaa tababarada shaqooyinka xagaaga ee magaaladda Oulu.

Tababarada shaqooyinka xagaagu waxay qaadaneysaa bil saacadaha shaqaduna waa 30 saacadood wiigii. Tababarada shaqooyinka waxaa lagu bixinayaa mushahar dhan 1100 yuuro. Mushaharkaa waxaa laga dhimayaa cashuurta sida kaadhka ardeynimadu dhigayo. Waxaad ka dalban kartaa goobta tababarada shaqooyibka xagaaga wiiga 5 aad bilowgeeda ilaa kan 10 aad dhammaadkiisa.

Waxaad dalban kartaa tababarada shaqooyinka xagaaga, haddii:

- aad tahay ardey, aanand iskuulka xirfadana dhameyneynin isla gugaa ama waxbarashada xirfadaha ee sare.
- aad 18 sano buuxineysid sanadkaa la dalbanayo 30.4. inta laga gaadhayo.
- degmadaadu tahay Oulu.
- aanand shaqeyneynin tababarada shaqooyinka xagaaga ee magaaladda Oulu labadii xagaa ee hore.

Barnaamijka- shirkadaha xagaagu

Ma dooneysaa inaad tijaabisid shirkad yeelashada? Barnaamijka- shirkadaha xagaagu waxay ku wajahan yihiin 17 - 29-jorada dhallinyarta ah waxaana la qorsheeyaa xagaagii. Barnaamijkaa hadafkiisu waa in laguugu fidiyo adiga doorashooyin asal ah oo shaqooyinka xagaaga u dhigma shirkad ahaan. Barnaamijka- shirkadeynta xagaagu waxay adiga ku siineysaa fursad lagu tijaabiyo fikiradaada ganacsiga nidaamkooda.

Barnaamijka- shirkadaha xagaaga waxaad ka heleysaa:

- warbixinaha waxqabadyada shirkadaha qeybaha kala duduwan.
- La talyaha shirkadaha xagaaga, kaas oo ku caawineysa xagaaga oo dhan dhexdiisa.
- fursadahaa ka qeyb qaadashadoodu xilligga xagaaga waxaa loo diyaarinayaa munaasabadaha.
- kaalmada shirkadaha xagaaga, haddii
  ✓ degmadaadu tahay Oulu.
  ✓ aad tahay 17 - 24- jir.
  ✓ aad tahay ardey.
  ✓ aanad helin sateliga shaqooyinka xagaaga ee magaaladda Oulu isla sanadkaa.
  ✓ aanad helin booska tababarada shaqooyinka xagaaga ee magaaladda oulu isla sanadkaa.
  ✓ ka qeyb qaadaneysid barnaamijka- shirkadaha xagaaga ku hagitaankooda.
  ✓ Kaalmada waxaa lagu dalbanayaa codsiyo kala duduwan waxayna noqoneysaa in la isticmaalo gebi ahaanba waxqabadyada shirkadaha.

Warbixinaha dheeraadka ah ee barnaamijka- shirkadaha xagaaga waxaad ka heleysaa kesäyrittäjä.fi- bogooda.

Doorashooyinka kale

Doorashooyinka kale. Goobaha shaqooyinka xagaaga waxaad weydiin kartaa meelo badan. Weydii waalidkaa, asxaabtaada, asxaabtaada waalidkood, deriskaaga iyo kuwa aad taqaanid. Waxaad ka heleysaa goobaha shaqooyinka xagaaga sidoo kale tukaanka xaafadaada ama hiwaayadahaaga, sida naadiyada isboortiyada. Internetka iyo baraha warbaahinta bulshada waxaa sidoo kale ku jira meelo wanaagsan oo aad ka raadin kartid shaqooyinka xagaaga.

Shaqooyinka xagaaga waxaad u diri kartaa sidoo kale dalka dibadiisa tusaale ahaan dhinaca Nord.Jobbka. w´Warbixinaha dheeraadka ah iyo shaqooyinka banaan ee wadamada reer galbeedka luqadahooda waxaad ka heleysaa cinwaanka nordjobb.org.

Marka aad bilaabeysid shaqooyinka xagaaga, sii shaqo bixiyahaaga kaadhkaaga cashuurta iyo akoon lambarkaaga. Sii sidii kale shaqo bixiyahaaga sateliga shaqada xagaaga ee suurtogalka ah. Xasuuso, in heshiiska shaqada la sameeyo mar walba qoraal ahaan. Heshiiska shaqada waxaa lagaga heshiinayaa sida xilliyada shaqada iyo mushaharka.

Inta aanad shaqada bilaabin

- sii ogow, imisada ayaa shaqada ay tahay in la joogo.

Weydii shaqo bixiyaha

- goorma ayaa goobta shaqada la galaa biriiga/ nasiinada.
- ma isticmaali kartaa telefoonkaaga xilliyada shaqada.
- qofkee iyo sidee ayaad u soo wargelineysaa goobtaada shaqada, haddii aad xanuunsatid.

Marka ay kuu dhamaato shaqada xagaagu, ka codso inaad ka heshid shahaadada shaqada. Haddii ay shaqadu u socoto si wanaagsan, weydii, ma isticmaali kartaa shaqaale bixiyahaagu inuu kugula taliyo/ kugu amaanayo CV:gaaga.

Haddii aad adigu qabtid weydiimo shaqada xagaaga ah ama adigu aad dhibaatooyin ku qabtid goobtaada shaqada xagaaga codso talooyin. Waxaad weydiin kartaa shaqo bixiyahaaga weydiimahaa, kuwa la xidhiidha goobtaada shaqada xagaaga. Haddii aanad weydiin kareynin shaqo bixiyahaaga, waxaad la xidhiidhi kartaa tusaale ahaan Byström Ohjaamo kooxda shaqooyinka xagaaga ama International House Oulu (IHOulu).

Waxaad qaadaneysaa arrimaha sidoo kale inaad iskaa u soo ogaatid tusaale ahaan Tyoelamanpelisaannot.fi - bogga shabakada oo luqado kala duduwan ah. Kesäduunari- Infopuhelin waxay kuugu adeegeysaa finnish, iswidhish iyo ingiriiso bisha may marka horey loogu sii socdo. Kesäduunari. fi-bogga shabakada waxaad ka heleysaa warbixinaha xidhiidhka iyo jawaabaha diyaarka ah ee weydiimaha guud ahaaneed.

Byströmin OHJAAMO OULU NUORISOPALVELUT